Xafiiska Maamulka Dacwad Dhagaysiga ee Gobolka Washington
Racfaanka Caymiska Shaqo la'aanta (Unemployment Insurance Appeal)

# Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga (Notice of Hearing)

Waxaad ka leedahay dacwad dhegaysi soo socota kiiskan: Magaca Dacwoodaha,, LAMBARKA AQOONSIGA Lambarka kiiska.

Tani waxay saameyn kartaa xuquuqdaada sharciga ah.
**Si taxadar leh u akhri dhammaan dukumeentiyadan si aad u ogaato waxaad u baahan tahay inaad samayso.**

| | |
|---|---|
| Taariikhda Dacwad dhageysiga: | Taariikhda dacwad dhageysiga |
| Wakhtiga Dacwad dhageysiga: | Wakhtiga dacwad dhageysiga<br>Wakhtiga Baasifigga |
| Nooca Dacwad Dhageysiga: | Taleefoonka – Na Soo Wac<br>Dhinaca dambe ee boggan (bogga labaad), akhri tilmaamaha lambarka taleefanka iyo koodhka |
| Garsooraha: | Magaca garsooraha |

### Maxaa dhacaya haddii aanan soo wicitamin wakhtiga dacwad dhegeysiga?

Haddii AAD xareysatay racfaanka oo aadan soo wicitamin, garsooraha waxaa laga yaabaa inuu hawada ka bixiyo racfaankaaga. Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 34.05.440(2).

Haddii AADAN soo xareysan racfaanka oo aadan soo wicitamin, garsooruhu wuxuu gaari karaa go'aan ku saleysan waxa ay dhinacyada kale ka yiraahdaan dacwad dhageysiga.

Soo wac Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka (Office of Administrative Hearings, OAH) sida ugu dhakhsaha badan Haddii aad u baahan tahay taariikh iyo wakhti dacwad dhegaysi oo ka duwan kuwa hadda.

Dacwad dhageysiga ayaa dib loo dhigi doonaa oo kaliya haddii garsooruhu uu go'aansado inaad haysato sabab wanaagsan.

### Hadda maxaan sameeyaa?

Akhri dhammaan dukumeentiyada laguu soo diray. Waxaa ku qoran macluumaad muhiim ah, oo ay ku jiraan sida dukumeentiyada loogu diro garsooraha.

Haddii lambarka taleefankaaga ama ciwaankaagu isbeddelo, la xidhiidh OAH isla markiiba.

Haddii aad u baahan tahay turjubaan, waxaanu kugu siin doonaa mid si bilaash ah. Haddii aad u baahan tahay wax horay ugu sii qabanqaabinta dadyowga naafadda ah, waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan ku caawinno. La xidhiidh OAH si aad u codsato turjumaan ama wax horay u sii qabanqaabin.

Waad is-matali kartaa naftaada, laakiin sidoo kale waxaad qabsan kartaa qareen ama waxaad weydiisan kartaa saaxiib ama xubin qoyskaaga inuu ku matalo. Faahfaahin dheeraad ah ka akhri qaybta "Matalaada" ee ku lifaaqan "Sida La Isugu Diyaariyo Dacwad Dhageysigaaga Shaqo La'aanta". Waxa ku jira agabyo loogu talagalay kaalmada sharci ee bilaashka ah.

TUSAALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

## Sida Loo soo Waco Maxkammada Dacwad Dhageysiga

1. Shan daqiiqo ka hor dacwad dhegeysigaaga, wac 1-866-527-0393. **Ha wicin wax ka badan shan daqiiqo ka hor**.

2. Geli KOODHKA gelitaanka dacwad dhageysiga ee gaarka ah oo ayna soo raacdo furaha **#** .

3. Adigu ma tihid Qabanqaabiyaha Kulanka sidaa darteed HA riixin furaha * haddii laguu sheego inaad sidaas samayso.

4. Hadda waxa lagugu meelayn doonaa hoolka ay ka dhaceyso dacwad dhagaysiga adiga oo sugaya garsooraha si uu u bilaabo dacwad dhagaysiga (waxa laga yaabaa in aad maqasho muusigada HOLD).

5. **Waa muhiim inaad ku soo wacdo dacwad dhageysiga wakhtiga loogu talagalay.** Haddii aad soo wacdo dacwad dhegeysiga goor danbe, racfaankaga waa la burin karaa, oo waxaad waayi kartaa xaqa aad u leedahay dacwad dhegaysiga.

6. Haddii ay dhibaato kaa qabsato ku soo biirista wicitaanka, ama haddii garsooruhu aanu ku soo biirin wicitaanka 10 daqiiqo gudahood ka dib wakhtiga dacwad dhegaysiga, isla markiiba ka wac OAH lambarka (800) 366-0955. Markaad wacdo OAH ma lumin doontid fursadaada ku aadan inaad ku biirto dacwad dhegeysigaaga.

7. Haddii uu khadka kaa go'o, kaliya dib u soo wac (Tallaabada 1) oo isticmaal isla koodhka (Tallaabada 2). Haddii ay dhibaato kaa haysato ku soo xidhashada wicitaanka, isla markiiba soo wac (800) 366-0955 si aad caawimo u hesho.

## Dacwad dhegeysiga ka hor: Is-diyaari

Xaqiiji in **taleefankaagu leeyahay** qabasho, uu si buuxda jaajar u leeyahay, oo uu haysto daqiiqado kugu filan oo soconayaan ilaa laba saacadood.

Haddii aadan haysan taleefan aad ku isticmaali karto dacwad dhageysiga, la xiriir xafiiskaaga WorkSource.

Ka soo wac goobta dacwad dhageysiga adigoo jooga **meel degan** halkaas oo si cad wax uga maqli karto oo si cadna laguu maqli karo. Sawaxanka nawaaxiga ka imaanaya waxa laga yaabaa inuu carqaladeeyo duubista dacwad dhageysiga.

Hayso **Ogeysiiskan Dacwad Dhageysiga** iyo dukumeentiyada taageerada ee ku lifaaqan meesha wakhtiga dacwad dhegeysiga. Waa inaad dib u eegtaa dukumeentiyada taageerada ka hor dacwad dhegeysigaaga.

Diyaarso **qoraaladaada ku saabsan taariikhaha muhiimka ah** iyo macluumaadka kale ee khuseeya kiiska.

Ka akhri dukumeentiyada ku lifaaqan meeshan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isku diyaarinta dacwad dhageysigaaga.

TUSAALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

## Ujeedada Dacwad Dhageysiga (Purpose of Hearing)

Dacwad dhageysigan ayaa loogu talagalay in wax looga qabto rafcaanka laga qaatay go'aanka Waaxda Amniga Shaqada (Employment Security Department, ESD).  Dacwad dhageysiga waxaa qaban doona Garsoore Sharci Maamul (Administrative Law Judge, ALJ) oo madax banaan si uu u tixgeliyo:

- Liiska arrimaha uu garsooruhu ka tixgelin doono dacwad dhageysigaaga.

ESD waxay racfaanka u gudbisay wakaalad dawladeed oo gaar ah, Xafiiska Dacwad Dhagaysiga Maamul, si loogu qaado dacwad dhageysi madax banaan. OAH waxay awood u leedahay inay go'aan ka gaarto racfaanka iyadoo ku saleysan RCW 34.05.431 iyo Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 10-08-180.

***Muhiim ah:*** *Qoryaha yaryar iyo hubka kale ee halista ah gabi ahaanba waa ka mamnuuc goobta dacwad dhageysiga ee la soo xaadiraayo iyo dhammaan xafiisyada Xafiiska Dacwad Dhagaysiga Maamul. WAC 10-20-010.*

Taariijkheysan laguna soo diray boostada: Taariikhda marka Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga boostada laguugu soo diro

TUSAALE

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.

Shahaadada Adeegga (Certificate of Service)

Waxaan cadeynayaa in aan nuqul ka mid ah amarkan boostada ugu diray dhinac kasta cinwaanka hoos ku qoran, boostada horayba lacagta looga sii bixiyo, taariikhda sare lagu xusay.

______________________________________

Wakiilka
Xafiiska Dacwad Dhagesiga Maamulka

Liiska qof kasta oo loo soo diray Ogeysiiskan Dacwad Dhageysiga.
Haddii aad soo gudbinayso dukumeentiyo, waxaad u baahan doontaa inaad nuqullo u dirto dhinac kasta oo liiska ku jira.

TUSAALE

Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.